Can Anybody Help?
Ma jiraa qof i kaalmeyn kara?

Qareenka Xuquuqda
Canshuur Bixiyaha Minnesota

Ma jiraa Qof i kaalmeyn kara?
Haddii aad wax dhibaata ah ku qabto waaxda lacagta ee Minnesota, waxaa laga yaaba in xafiiska qareennada xuquuqda canshuur bixiyaasha ku kaalmeyn karaan. Waxaan baareynaa xaalada canshuur bixiyaha iyo cabashooyinkiisa. Marka dabadeed waxaan waxbixin toos ah siineynaa Wakiilka hay'adda (commissioner), waxaad keensan kartaa qof wakiil kaa noqdo.

Waxaan sameyno
Waynu ka jawaabnaa wixii kaalmo ah ee nala weydiisto**.** Waxaan dhageysanaa dhibaatooyinkaada, baareynaa xaaladaada, hubineynaa diiwaanada waaxda (lacagta), kana wada hadli doonaa cabashadaada. Haddii aad u baahato qof ku kaalmeeya, ama ay Waaxda (lacagta) aysan kuu soo jawaabin, annaga ayaa ku talaabsan doona in aynu ku caawino. Mararka qaarkood kaalmada waxay noqon kartaa mid fudud in aynu kugu xirno qofka saxda ah ee Waaxda (Lacagta) ee qeybta ugu haboon. Laakiin haddii dhibaato dheeri ah jirto, taasoo abuureyso xaq daro iyo xaalad cadaalad xumo ah oo cirib xumo kuu keeni karta, Waxaan soo saari karnaa "Amar lagu kaalmeynayo canshuur bixiyaha". (MN Stat. 270.273C.37, Subd.1)

Waxaa barbaryaal dib u eegidda dacwooyinka gaarka ah, annagoo ka qeyb qaadana guddiga sameynta sharciga Waaxda (lacagta), una ololeeyna (lobby) arrimaha canshuur bixiyaasha, soona jeedina talo sharci dejin ah (legislation). Waxaan dadweynaha barnaa siyaasadda waaxda (lacagta) habka ay wax u qabato, nidaamka ay raacaan iyo sharciga canshuuraha Minnesota.

Qareenka wuxuu kaalmo ka bixiyaha…
- Hubiyo cadaalada iyo isticmaalka joogtada ah ee sharciga canshuuraha. Minnesota iyo siyaasadaha Waaxda.
- cabashooyinka iyo qadiyadah khuseeya canshuur bixiyaha dadka siyaasadda iyo sharciyadda u dejiya gobolka.
- Aragti cusub ka bixiyo xaaladaha la soo gudboonaada canshuur bixiyaha. marka lagu soo hongoobo jidadka maamul ee kale.
- Maamulo Barnaamijka loo dajiyey Dadka si Wadajir wax ka dhaxeeyo (Xaasaska Isfura).
- Helo xal, talona ka siiyo canshuur bixiyaha dhibaatada ku soo wajahan.
- Dhexdhexaadiyo si xal loogu helo ismarin waaga ka dhexdhici kara Waaxda. iyo Canshuur bixiyayaasha.
- Keeno bedel lagaga doorsan karo jaranjarradda caadiga ah ee hadda. canshuur bixiyayaashu kula xiriiraan Waaxda.
- Keeno meel kale oo lagala xiriiri karo Waaxda Maclumaadka Dakhliga.

- U doodo canshuur bixiyaha mararka ay la soo gudboonaato xaalado marka lagu tilmaami karo “dhibaato qalafsan” (significant hardship).
- Wax ka Qabta Dibna u Eega Kiis ay Waaxda Soo Aruurista ku soo aruurisay deymo aan canshuur ahayn.

Waa maxay “dhibaato qalafsan”?
Haddii arrinta canshuurtaada ay abuurto arin dhib badan, waxaad na weydiisan kartaa kaalmo. Arin dhib badan micno ahaan waxa loola jeedaa haddii aad u heli weydo nafsadaada ama qooyskaaga waxyaalaha lagama maarmaanka ah. Tusaale ahaan, Haddii aad heli weydo cunno iyo hooy, aad bixin weydo korontada iyo biyaha, shaqada aad ka tagto ama aad gadan weydo daawayinkii loo baahna.

Hawlaha sharci fulinta ee Waaxda, sida lacag ka jaridda mushaarkaada ama xisaabta bankigaada, ma lagu tirin karo in ay tahay arin dhib badan, in kastoo ay arrimahaasu kaa hor istaagi karaan bixinta biilalka aad is leedahay waa muhim sida lacagtaada canshuurta.

Xaaladaas badankood, waxaa kula xalin kara shaqaalaha waaxda ee loo qoondeeyey arintaada. Laakiin haddii ruuxa uu kari waayo ama uusan rabin in uu ku kaalmeeyo waqtigaa si loo baajiyo dhibaatada, waxaad weydiisan kartaa xafiiskeena in uu dib hubin u sameeyo si deg deg ah.

Qareenka ma sameyn karo in uu …..
- Badalo sharciga canshuurta Minnesota xaalado shaqsiyeed aawgeed.
- Dhexgelo habka nidaamyada caadiga ah in ay xaalado dhibaato adag ah oo la og yahay jiraan mooyee.
- Badalo waqtiga u xadadan xareynta, lacag-bixinta ama lacag-celinta.
- Matalo lataliye-sharci ee xaalado shaqsiyadeed.
- Kaa kaalmeeyo canshuurta dakhliga ku soo galo ee Federaalka (federal income tax) ama canshuurta aad u celineyso gobolo kale ama wakaalado gudaha ah (waxaan ku siineyna magacyo shaqsiyaad wakaaladaha ah ee kaa kaalmeynayo).

Sida aad noola soo xiriiri karto
Naga soo wac (651) 556-6013
Haddii aan maqanahay noo reeb Magacaaga, lambarka social securitiga, lambarka telefonka iyo sababtaad noo soo wacday. Dib ayaan kuu soo wici doona.

Cinwaankeenu waa: 600 North Robert Street, St. Paul, MN

Xafiiska wuxu furan yahay laga bilaabo 8:00 aroornimo ila 4:00 galabnimo, Isniin ilaa Jimco. Fadlan horey u soo wac haddii aad rabto in balan aad ku aragto qareenka.

U soo dir wixi qoraal isweydaarsi ah:

Advocate Office
P.O. Box 7335
St. Paul, MN. 55107-7335

Xogta Jibaytadda (Data privacy)

Sharciga xogta jibaytadda ee Minnesota wuxuu naga mamnuucaya in aan kala sheekaysano qof aan adiga ahayn. Haddii aad u ogolaato in aan qof kale kala sheekeysano ama aan siino warbixin ku saabsan canshuurtaada waa in aad na siiso foomka "wakiilashada" (power of attorney) oo saxiixan. Foomkan waxa laga helaa bogga interneetka ee http://www.taxes.state.mn.us/forms/rev184.pdf

Marka aad taleefonka ku dalbanayso, shakhsiyaadka waa inay wacaan: (651) 296-4444. Lambarka foomanka ganacsiga waa 651-556-5209.

Taariikhda iyo ujeedada

Xafiiska qareenka waxa la asaasay 1990ki ayado lagu bilaabay meel ee canshuur bixiyaasha ay ka helaan dib u hubin xor ah ee xaalada canshuurahooda, ayagoo gacan ka geysanayo ayidayanana ujeedada waaxda ee xaqa iyo cadaaladda dabakhidda sharciyada canshuuraha.